

# Wadahadalka warbixinta oo kooban

Warbixin ku saabsan dayeel,deegaan iyo la kulanka

MYNDIGHETEN FÖR FAMILJERÄTT OCH FÖRÄLDRASKAPSSTÖD

# Helidda xal iyadoo la eegayo waxa caruurta u wanaagsan

Si loo xoojiyo aragtida xaquuqda caruurta ee habraacad daryeelka iyo, haday suurtagal tahay, ka baaqashada xilaaf maxkamada gaara, waxa ay dowladdu go'aansatay inay hirgeliso sharci ku saabsan wadahadalka warbixin.

Ficil ahaan waxa ay ka dhigan tahay in waalaidka ka fiirsanaya inay ka furaan dacwad khilaaf maxkamadda oo ku saabsan daryeel, deegaan iyo la kulanka inay helaan warbixin ku saabsan kaalmada iyo taageerada ay iyagu heli karaan si ay u heli karaan xal la'aanta habraac maxkamadeed oo muhiimada la saarayo wanaaga caruurta.

Halkan waxa imanaya gunaanad kooban oo ku saabsan wadahadalka warbixinta iyo talaabooyinka jira wadahadalkaas kadib.


"Waxay u ahayd waqti culus, dhamaan
intii ku lug lahayd. Laakiin wadahadalka
warbixinta awgeed waxay arkeen ifiimin"

# Soo koobidda wadahadalka warbixinta iyo talaabada muhiimka ah ee xigta

Sharciga cusub ee ku saabsan wadaadalka warbixinta waxa uu dhaqan galayaa laga bilaabo koowda janaayo 2022. Laga bilaabo koowda maarso 2022 waxa ay ku noqonaysaa shuruud waalidka iyagu doonaya inay dacwad xilaaf oo ku saabsan daryeel, degaan iyo la kulan ka furaya maxkamadda inay mudadaas kahor ay kasoo qayb galaan wadahadalka warbixin.

Wadahadalku waxa uu siinayaa sawir guud oo ku saabsan taageerada la heli karo ee jira si loo helo xal wadar ogol ah iyo in isla mar ahaantaas looga baaqsado hhabraac maxkamadeed. Wadahadalka warbixiintu waxa uu xittaa cadaynayaa waxa dhacaya hadii aanan lagu heshiin ama hadii uu xal wadar ogol ah uusan munaasab ku ahayn.

Waxa gacanta koowaad ka mas'uul ah wadahadalka warbixinta gudiga bulshada/xaquuqda qoyska ee degmada ay caruurtaadu ka diiwaan gashan yihiin iyo in wadahadalkani uu mar walba kharash la'aan u yahay waalidiinta.

## Wadahadalka wadashaqaynta madaxa banaan

Sida badan waxa u wanaagsan caruurta hadii uu waalid-ku heshiin karaan iyagu. Sidaas daraadeed inta lagu guda jiro wadahadalka warbixinta waxa lagugu wargelinayaa adiga fursada ku saabsan waxa loogu yeero wadahadalka wadashaqaynta. Waa wadahadal nidaamsan oo uu qabanayo hogaan sugan oo aqoon uleh. Wadahadalka wadashaqaynta ujeedadiisu waxa ay tahay in waalidku iyagu xaliyaan su'aalaha ku saabsan daryeelka, deegaanka iyo la kulanka iyo masruufka caruurta iyaga oo si wadajir ah ula imaanaya waxa u wanaagsan caruurta.

Wadahadalku waxa uu qabsoomayaa xiliga kala taga ama kadib laakiin xitaa waalidka aan weligood isla noolaan. Marka laga reebo inay ku midoobaan su'aalaha khuseeya caruurta, ujeedka wadahadalku waa in xittaa waalidku uu wanaajiyo kartidooda ah inay ka wadashaqeeyaan waxyaalaha khuseeya caruurtu u baahan yihiin iyo rabitaankooda.

**FG:** Wadahadalka wadashaqaynta ma aha mid bedelaya wadahadalka talosiinta reerka ee markaas jira, maadaama wadahadalaas ay leeyihiin muhiimado kala duwan. Talosiinta reerka muhiimadiisu waxa uu diirada siirayaa xiriirka ka dhaxeeya adiga iyo lamaanahaada. Wadahadalka wadashaqayntu waxa uu ku saabsan yahay suurtagalnimada wadashaqayn iyo xiriir hirgala oo ku saabsan caruurta kalatag kadib.

### Hadii aad heshiisaan

Hadii adiga iyo waalidka kale aad isku afgarataan caruurta deegaankooda iyo la kulankooda waxa aad samayn kartaan heshiis afka ah ama samayn kartaan heshiis qoraal ah. Heshiisku waxa uu noqonayaa mid sharci ahaan waajib noqonaya marka ay gudiga bulshadu ogolaadaan. Marwalba waa wanaaga caruurta midda wax kala saaraysa oo diirada la saarayo marka la ogolaanayo heshiiska.

Daryeelka ku saabsan caruurta waxa uu noqon karaa mid goni ah ama wadajir ah midkood oo sadax qaabna waa loo bedeli karaa. In iyadoo loo marayo qaab heshiis ay ogolaatay gudiga bulshada, iyado loo marayo xukun maxkamadda darajada koowaad ama iyadoo loo marayo wargelin wadajirta oo ku socota hay'adda canshuuraha. Midda ugu danbaysa ee la sheegay waxa keliya oo ay suurtagal tahay marka wargelintu khusayso daryeelka wadajirka ah iyo marka aan horey loo gaarin wax go'aana oo ku saabsan daryeelka.

Heshiis lagu ag qoray xaquuqda qoys waa mid sharci ahaan ku waajib gelinaya si lamid ah xukunka maxkamadda darajada koowaad. Marka la qiimaynayo waxa ay tahay waxa diirada la saarayo wanaaga caruurta iyo waxa baaritaanka



loo samaynayo ay tahay in la cadeeyo in heshiisku uu yahay wanaaga caruurta kahor inta aysan gudiga bulshada ee degmada ay caruurtaada ka diiwaan gashan yihiin uusan ogolaan.

**Marka AYSAN suurtagalka ahayn in la helo xal wadar ogol ah**
Waxa jira xaalado aysan suurtagal ahayn ama aysan ku haboonayn in la helo xal wadar ogol ah. Tusaale waa hadii dhibaatayn ama ku xadgudub uu dhacay. Xaaladahaan oo kale waxa fiican in maxkamaddu ay go'aamiso waxa u wanaagsan caruurta.

Waa ay adag tahay in la sheego inta ay qaadanayso habraaca maxkamadeed ee arimaha daryeelka-deegaanka iyo la kulanaka. Waxa ay qaadan kartaa ilaa iyo hal sano, laakiin waxa jira tusaalaha kiis ay qaadatay waqti ka yar ama ka badan labadaba. Waxay ku xiran tahay sida isku dayo xalal wadar ogol ah iyo heshiisyo la sameeyey ilaa iyo intii maxkamadda la bilaabay, laakiin xitaa in xukun racfaan laga qaatay.

## Ku saabsan habraaca maxkamadda

**Ashtakayn**
Si ay maxkamadda usoo qaado su'aalo ku saabsan daryeel, deegaan iyo la kulan waxay u baahan tahay in mid kamid ah waalidka uu dalab kasoo sameeyo ku saabsan ashtakayn. Si gooni ah waa loo fiiri karaa hadii uuba ka socdo maxkamadda darajada koowaad kiis furiin, markaas oo xitaa kiiskan lagu biirin karo su'aalaha ku saabsan daryeelka, deegaanka iyo la kulanka.

Hadii qof kamid ah waalidka uu dalbaday ashtakayn, waxa ay labada dhinacba codsan karaan in maxkamadda darajada koowaad ay u go'aamiso qaab uun. Kan raba inuu dalbado ashtakaynta waxa uu qoran karaa codsigiisa ama isticmaali karaa foomka maxkamadda. Khidmada dalabku waa 900 kr (ee sanadka 2022). Si ay maxkamaddu wax uga qabato dalabkaada waa inaad kusoo lifaaqdaa warqada dhalasha ee caruurta. Warqada dhalashada waxa aad ka dalbanaysaa hay'adda canshuuraha. Waxa kale oo aad kusoo lifaaqaysaa cadaynta wadahadalka taasoo cadaynaysa inaad ka qayb gashaywadahadalka warbixinta khasabka ah. Cadaynta waxa soo saaraya horjoogaha wadahadalka ee fuliyay wadahadalka warbixinta. Hadii aan lala soo dirin cadaynta dalabkaada waa ay soo diidaya maxkamadda darajada koowaad.

**Difaaca iyo aalmada sharciga**
Midka kugu matalaya maxkamadda waxa lagu magacaabaa wakiil. Wakiil sida caadiga ah waa qareen ama qof kale oo leh waxbarasho sharci. Adiga ayaa go'aansanaya in aad qabsato wakiil iyo in kale, kharashkana adiga ayaa qaba. Kiis ku saabsan daryeel, deegaan iyo la kulan sida caadiga ah dhinacyada ayaa iska bixiya kharashaadka maxkamadaynta.

Hadii aad leedahay caymis guri waxa aad ka heli kartaa lacag dhankaas ee la xiriira khilaafka. Waxa la yiraahdaa difaaca sharciga. Difaaca sharciga waa difaac caymis oo inta badan la socda caymisyada guriga, fiilada iyo guryaha waqtiyada firaaqada. Shirkadda caymiskaada ayaa si dhow kuu siinaysa warbixinta ku saabsan waxa la socda difaaca sharciga. Mararka qaar waa suurta gal in aad dowladda ka hesho kaalmo oo ay bixiso qaybo kamid ah kharashaadkaada maxkamadaynta. Waxa la yiraahdaa kaalmada sharciga. Kaalmada sharciga waa kaalmo dhaqaale oo lasiiyo qofka aan haysan difaaca sharci. Si aad u hesho kaalmo sharci waxa ay u baahan tahay in dhaqaalahaadu uusan ka sarayn ilaa heer oo hadda dhan 260 000 kr sanadki (2022).

Sharciga guud waxa uu yahay inaad difaaca sharciga aad kaga faa'iidaysatid caymiskaada marka aad dacwad khilaaf uga baahan tahay kaalmo dhaqaale. Hadii aadan haysan caymis ama caymiskaada uusan ku jirin waxa aad talo ulasoo xiriiri kartaa qareen ama wakiil sharci yaqaan. Wakiilku waxa uu kaa kaalmaynaa adiga inaad xaliso khilaafka, meel ka bax-san maxkamadda ama maxkamadda gudaheeda midkood. Dalabka ku saabsan kaalmada sharciga waxa loo diri karaa hay'adda kaalmada sharciga ama maxkamadda, hadii ay arintu ay agtaalo maxkamadda. Hay'adda kaalmada sharciga ama maxkamadda ayaa go'aaminaya in aad xaq uleedahay taageeradaas dhaqaale.

**Diyaargaroow afka ah**
Maxkamadda darajada koowaad waxa ay idinkugu yeeraysaa diyaargaroow afka ah. Ujeedada kulankaas waxa uu yahay in adinka waalidka ah aad qaadiga usheegtaa waxa ay idinla tahay inay caruurta u wanaagsan yihiin. Qareenku waxa ay howshiisa tahay inuu baaro kiiska iyo waajib ah, haday suurtagal tahay, inuu idinka waalidka ah idinku kaalmeeyo inaad la timaadaan xal wadar ogol ah oo u wanaagsan caruurta.

Waxa dhici karta in adiga yo waalidka kale inaad ku heshiisaan xal ku meelgaar ah ama mid dhamaystiran oo u wanaagsan caruurta inta lagu guda jiro diyaargarowga afka ah. Markaas waxa ay maxkamaadda darajada koowaad go'aami-naysaa si waafaqsan wixii aad ku heshiiseen. Shuruudo waxa ay tahay in heshiisku uu waafaqsan yahay waxa u wanaagsan caruurta. Hadii aadan heshiis gaarina waxa ay maxkamadda darajada koowaad go'aaminaysaa waxa lagu sii dhaqmi doono, la dhihi karo mudada uu khilaafku socdo. Go'aankaas ku meelgaarka ah waxa luqada sharciga lagu magacaabaa go'aan ku meelgaar ah. Qaadigu waxa kale oo uu go'aamin karaa wadahadal wadashaqayn ama dhexdhexaadin.

**Kugu xiraya warbixino dheeraada (afka iswidhishka)**

- Foomka dalabka ashtakaynta
- Lacagta xiligaas jirta ee khidmada dalabka
- Foomka inaad dalbato warqada dhalashada
- Xaq ma uleedahay kaalmo sharci? / waa imisa cadadka lacagta markaas jirta?

**Faahfaahino kahor go'aan ku meelgaar ah**

Kahor go'aankaan ku meelgaarka ah waxa ay maxkamaddu dalban kartaa faahfaahin ka timaada xaquuda qoyska ee adeega bulshada. Taas macnaheedu waa in gacan yare ka tirsan xaquuqda qoyska uu warbixin kasoo saarayo diiwaanka adeega bulshada, diiwaanka booliiska iyo weliba, hadii aysan adiga kuugu ahayn munaasab, waalidka kale iyo caruurta. Balse gacan yaruhu uma soo gudbinayo wax ra'ayigiisa ah oo ku aadan go'aan.

Markaas kadib ayay maxkamaddu go'aaminaysaa go'aan ku meelgaar ah oo ku saabsan daryeel, deegaan iyo la kulan.

## Wadaahadal wadashaqayn, dhexdhexaadin iyo baaritaan

**Wadahadal wadashaqayn**

Hadii aadan horey uga qayb qaadanina wadahadal wadashaqayn waxa ay maxkamadda darajada koowaad go'aamin kartaa go'aankan. Taas macnaheedu waxay tahay in gudiga bulshadu ay helayaan howasha ah inay qaban qabiyaan wadahadal wadashaqayn oo ka duulaya baahida caruurta. Maxkamadda darajada koowaad waxa ay go'aaminaysaa mudada iyo in mudadaas lagu dhawaaqaa in garnaqsiyada maxkamadeed la hakiyay. Kadib marka ay kasoo dhamaato gudiga bulshada waxa ay maxkamadda darajada koowaad soo wargelinaysaa in hesiis la gaaray iyo in kale.

**Dhexdhexaadin**

Hadii maxkamadda darajada koowaad ay udirto dhexdhexaadiye inuu idinka idinka kaalmeeyo inaad gaartaan xal wadar ogol ah oo waafaqi karta wanaaga caruurta waa in dhexdhexaadintaas si guud ahaan lagu fuliyaa afar asbuuc gudahood. Maxkamadda darajada koowaad waxa ay si dhow oo joogta ah u tilmaami ugu diri doontaa dhexdhexaadiyaha in uu isaga ama iyada uga foojinaada marka howsha la fulinayo. Dhexdhexaadiyuhu waxa uu maxkamadda usoo gudbin doonaa warbixin marka lasoo dhameeyo howsha wax kaqabadyadii uu sameeyey.

**Baaritaan**

Hadii ay noqon lahay wadahadal wadashaqayn ama dhexdhexaadin waxa ay maxkamaddu udiri kartaa gudiga bulshada inay soo fuliso baaritaan dhamaystiran si loo ogaado waxa u wanaagsan caruurta.

Gudiga bulshada/xaquuqda qoyska waxa ay u qabanaysaa baare usoo qabanaya waalidka balantoodii koowaad, si wadajir ah ama si gooni gooni ah midkood. Kulankaas waxa aad heli doontaan in howsha sii socota ee baaritaanku. Booqasho guri ayaa labadiinaba laydinku soo smaynayaa iyo wadahadal labadiina iyo caruurtaba ah oo qabsoomaya. Wadahadal kale oo dheeraada oo lala yeesho idinka iyo caruurta waxa uu ka dhacayaa xafiiska xaquuqda qoyska. Waxa lasoo ururinayaa warbixnada iskoolka, dugsiga xanaanada, diiwaanka bulshada iyo diiwaanka booliiska iyo weliba, hadii uu jiri ogolaanshiyo, xitaa laga soo qaadayaa daryeelka caafimaad iyo bukaanka. Warbixinada waxa laysugu gaynayaa warbixin baaritaan oo halkaas lagu soo gudbinayo xalalka kala duwan iyo caqabadaha ay ukeeni karaan caruurta. Qiimaynta waxa lagu salaynayo waa waxa u wanaagsan caruurta. Taas macnaheedu waa in baaruhu uu qiimaynta ka hubiyaa baahida caruurta ee xiriir dhow oo wanaagsan ay la yeeshaan labada waalid welibana sharaxaa



inay jirto khatar in caruurta ama qof kamid ah reerka ay dhibaato soo gaarayso. Idinka waalidka ah waxa fursad laydiin siin doonaa inaad aragtidiina soo gudbisaan baaritaanka oo ay tahay in lasoo gabagabeyo afar bilood gudahood. Qiimaynta iyo ra'yiga go'aanka waxa markaas kadib loo soo gudbinayaa maxkamadda iyo waalidka.

**Dhowr diyaargaroow oo afka ah, garnaqsi guud iyo xukun**
Maxkamadda darajada koowaad waxa ay qaban kartaa hal kiis dhowr diyaargaroow oo afka ah. Hadii adinka waalidka ah aadan heshiinina waxa ay maxkamadda darajada koowaad qabanaysaa garnaqsi guud oo kama danbays ah halkaas oo sida sharciga ah lagu dhagaysanayo waalidka iyo marqaati haday jiraan. Xittaa cadaymo qoraala waa lasoo bandhigi karaa. Markaas kadib ayay maxkamaddu go'aaminaysaa waxa ay tahay daryeelka, degaanka iyo la kulanka. Kala goynta go'aanku waa waxa u wanaagsan caruurta.

Sida badan waxa xukunka lasoo wargeliyaa mar kale. Gudoomiyaha maxkamadda darajada koowaad ayaa sheegi doona maalinka iyo saacada la sheegi doono xukunka. Marka xukunka lasoo wargeliyo waxa loo soo dirayaa idinka ama wakiiladiina.

Qiimaynta in aad yeelan doontaa daryeel wadajira ama hadii mid idinka idinka mid ah uu helayo mid ugooni ah waxay maxkamaddu si gooni ah ugu xiraysaa kartidiina ah inaad baahida ilmaha hormarinaysaan iyo inaad mas'uuliyad iska saaraysaan su'aalaha khuseeya caruurta..

## Inaad racfaan ka qaadato xukun maxkamadeed

Waalidka raba inuu racfaan ka qaato xukun ku meelgaar ah ee maxkamadda darajada koowaad ama xukunka khilaaf waa inuu qoraal ahaan usoo sameeyaa. Qoraalka waxa loo soo dirayaa maxkamadda darajada koowaad balse ku socota maxkamadda racfaanka. Qoraalku waa inuu soo gaaraa sadax asbuuc gudúhood laga bilaabo maalinkii go'aanka ama xukunka lasoo wargeliyay, ama (mararka qaar) laga bilaabo maalinka ay dhinacyadu heleen qayb kamid ah go'aanka. Waxay ku cadahay go'aanka ama xukunka sida la samaynayo hadii racfaan laga qaadanayo. Si ay maxkamadda racfaan u tijaabiso go'aan ama xukun waxa ay u baahan tahay in maxkamadda racfaanka ay so wargeliso ruqaso tijaabin, waxa la dhihi karaa in maxkamadda racfaanka u aragto in xukunku macno wayn u leeyahay maxkamadda darajada koowaad inuu ka ssacidayo inay xukunto dhacdooyin kale oo la mid ah-wax loogu yeeray horay loo xukumay.
Hadii ruqsada tijaabinta la ogolaado, waxa racfaanka la ogaysiinayaa dhanka kale si uu isagana markiisa ugu soo jawaabo waqti cayiman.
Mararka go'aanada (ku meelgaarka) racfaan loogama qaadan karo maxkamadda sare. Balse maxkamadda racfaanka waa looga qaadan karaa racfaan laakiin si maxkamadda sare ay u tijaabiso waxa halkana loo baahan yahay ruqsad tijaabin.

